

Xaashida Shaqada ee Qiyaasta Dakhliga 2025

Qiyaas dakhligaaga sanadlaha ee ka hor cashuurta (guud) ee iska diiwaangelintaada Goob Suuqeedka 2025

Muhiim ah! Iyada oo ay jirto mushahar kordhinta 2025 ee ay u gorgortameen Kooxdaada Gorgortanka ee Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee SEIU 503, dakhligaaga waxaa laga yaabaa inuu ka sarreeyo 2025 marka la barbardhigo 2024.

Mushaarada daryeel bixiyayaha	\$	_____
Dakhliga PTO ee Carewell	\$	_____
Dakhliga ka imaada kirada ama mushaharada	\$	_____
Dheefaha Soshal Sekurtiga iyo naafaha	\$	_____
Dakhliga kale ee federaal ahaanta la canshuuri karo (tusaale, dakhliga maalgashiga, baqshiishyada, iwm)	\$	_____
Wadarta guud	\$	_____

Waxa aad helaysaa Lacagta Cashuurta Hormariska ah iyadoo ku salaysan dakhligaaga la qiyaasay. Lacagta Cashuurta Hormariska ah (APTC) waa canshuur celin ay bixiso dawlada dhexe oo aad isticmaali karto si aad hoos ugu dhigto bixinta caymiskaaga billaha ah (loo yaqaano "khidmad") markaad iskaqorto qorshaha goobta Suuqa Caymiska Caafimaadka. Canshuur cellintaadu waxay ku salaysan tahay qiyaasta dakhliga iyo macluumaadka qoyska ee aad ku dhejisay codsigaaga goobta Suuqa. Haddii dakhligaaga lagu qiyaasay inuu u dhexeeyo boqolkiiba 100% iyo 400% ee Khadka Saboolnimada Federaalka, waxaad u qalantaa khidmada canshuur cellinta.

Si aad ugu qalanto Kaalmada Kharashka Daryeelka Caafimaadka si aad u bixiso khidmadaha ceymiska ee billaha ah ee qorshahaaga ku jira Goob-suuqeedka ee la ansixiyay, waa inaad codsataa APTC-gaaga oo buuxa ee ku aadan khidmadaha billaha ah ee ceymiskaada.

